Kitaabka Quduuska ah ee loogu talo galay Carruurta

Soo-jeedinayaa



# Boqor Daa'uud (Qaybta 1)

Waxa qoray: Edward Hughes

Waxa Tusaaleeyay: Lazarus
Alastair Paterson

Waxa dhaqan-geliyay: Ruth Klassen

Waxa tarjumay: Zemendale Translation Service
email: zemendale@gmail.com
Po Box 32155, Addis Ababa, Ethiopia

Waxa soo saaray: Bible for Children
www.M1914.org

©2023 Bible for Children, Inc.
Liisan: Waxaad xaq u leedahay inaad koobiyayso ama daabacato qisadan, in alla inta aanad ka iibinaynin.

Daa'uudkii dhalinyarada ahaa baxsad buu ku jiraa. Saa'uul baa doonaya inuu dilo. Daa'uud wuxuu ku nool yahay cidlada, god weyn baa waxaa kula jira afar boqol oo wiil.



Marar qaa, Saa'uul ciidankiisa inta badan wey helaan iyaga.  Laakiin Daa'uud wuu ka warwareegaa.



Adeehigii Saa'uul, Doo'eeg ayaa u sheegay boqorka in wadaaddada ay caawiyeen Daa'uud inuu baxsado. Saa'uulna amar buu ku bixiyey in la laayo. Laakiin Do'eeg keligii ayaa doonayay inuu taa sameeyo! Si xun buuna u gumaaday shan iyo sideetan wadaad iyo xaasaskoodii seeftiisa marsiiyey.. wax aad u xun bay ahayd.






Maalin baa, Saa'uul oo raadsanaya Daa'uud soo maray meel aad ugu dhow godkii - meeshuu Daa'uud iyo raggisiii isku qarinayeen. Saa'uul keligii buu ahaa!




Godkii gudihiisa, Daa'uud si sahlan buu u dili karayey Saa'uul. Intii uu sidaa samayn lahaa, intuu aad ugu dhowaaday ayuu hoos ahaan aayar ka goystay darafka Saa'uul khamiiskiisii. Markii u ka tagay meesha Saa'uul, Daa'uud wuu Daa'uud wuu ka daba qayliyey isagii. "Waxaan gooyey daqrafka khamiiskaaga, kumana dilin, haddaba ogow inaynan gacantayda ku jirin shar xadgudub toona ......"

Saa'uul wuxuu sheegay inuu ka xunt yahay isku daygii waxyeelada Daa'uud. Laakiin isla kolkiiba, cadhadiisii gaamurtay baa dib ugu soo laabatay oo saddex kun oo nin buu u diyaarshay inay Daa'uud soo dilaan. Habeen baa waxaa dhacday, intii ay ciidankii hurdeen, Daa'uud iyo Abiishay, mid ka mid ahaa askartiisii, u duseen xeradii meeshuu Saa'uul hurday.






"Maanta Ilaah wuxuu kuu soo gacan geliyey cadowgaagii," Abiishay ayaa sidaa yidhi. "Fadlan ii daa aan waeemo mar keliya aan dhulka ku qodbee: oo mar labaad ku dhufan mayo."



Wuu ka diiday Daa'uud. Wuxuunna ka qaatay warankii Saa'uul iyo kusadii biyaha ee Saa'uul, wuuna ka tagay xeradii. Dhanka kale intuu u gudbay ayuu istaagay buur iyaga in yar ka fog waddadeeda, Kolkaasaa Daa'uud dhawaaqay ilaa uu ka maqlo isaga codkiisa.



Markii mar kale arkay inuu Daa'uud dili karay isaga, laakiin uu sidaa samaynin. Markii mar kale, Saa'uul yidhi inuu ka xunyahay isku daygii waxyeelada Daa'uud dilkiisa.  Laakiinse Daa'uud wuu ogaa inuusan aaminayn erayga Saa'uul.





Wakhtigaa Samuu'eel wuu geeriyooday. Wuxuuna ahaa nabigii Ilaah u sheegay inuu subko Saa'uul, ka dib Daa'uud boqorka Israa'iliyiinta. Markii Falastiiniyiintii ay soo weerareen Israa'iliyiinta, Saa'uul wuxuu sameeyey wax xun, wax Rabbiga uu xaarantimeeyey.

Wuxuu amar ku bixiyey in loo soo kiciyo Samuu'eel meeshuu uu ku dhintay, habeenkas, Saa'uul wuxuu helay farriin.



" Oo Rabbiga kaa tagay oo u col kuu noqday … Rabbiga boqortooyadaadii gacantaada wuu ku dildilaaciyey oo wuxuu siiyey deriskaaga, kaasoo ah Daa'uud. Oo berito adiga iyo wiilashaadaba anigaad ila joogi doontaan. Oo weliba Rabbiga wuxuu adig iyo reer binu Israa'iilba u gacan gelin doonaa reer Falastiin." Markii uu taas maqlay Saa'uul, wuxuu la suuxay cabsi aawadeed.




Falastiiniyiintii waxay la dagaalameen Israa'iliyiintii, oo raggii Israa'iliyiinta way kala baxsadeen. Falastiiniyiintii waxay dileen wiilashii Saa'uul, oo uu ku jiro Yoonaatoon, Daa'uud saaxiibkiisii wanaagsanaa.




Saa'uul qaansooleydii aaawadeed ayuu dhib badan ula kulmay. Wuxuuna ku yidhi kii hubka u siday, "War seefta la soo bax oo igu mudhbixi, waaba intaasoo buuryaqabkii intay seef iga mudhbixiyaan i caayaan." Laakiin kii hubka u siday wuu diiday, waayo, aad buu u cabsaday. Sidaa daraadeed, Saa'uul wuxuu qaatay seeftiisii, markaasuu ku dul dhacay.





Heliddii maydkii Saa'uul iyuo wiilashiisii, Falastiiniyiintii waxay dhigeen maydkiisii magaaladii laga qabsaday Israa'iliyinta derbigeeda, qaar dhiiran oo ka mid ah raggii Israa'iliyiinta ayaa maydkii ka soo furtay meeshaa, una qaaday xaafaddii deedna ku gubay oo ku aasay wixii ka soo hadhay deegaankii Israa'iil.





Markii uu Daa'uud
maqlay warkaa xun,
wuu u murugooday oo
ilmeeyey oo soomay ilaa
gabal dhicii Saa'uul,
wiilkiisii Yoonatoon, iyo
dadkii Ilaah, sabata oo
ah waxay ku dhaceen oo
ku dhamaadeen seef.





Xitaa inkastoo Saa'uul isku dayay inuu dilo Daa'uud, haddana Daa'uud wuu xurmeeyey Saa'uul sidii Ilaah u subkaday mar un ilaa ugu dambeyntii. Iminka Ilaah baa sharfay Daa'uud, kana dhigay isaga boqor meeshii Saa'uul ku bedelay.

# Boqor Daa'uud (Qaybta 1)

Qiso ka ahaatay Ereyga Ilaah,
Kitaabka Quduuska ah,

waxa laga helayaa

1 Samuu'eel 24-31, 2 Samuu'eel 1-2

"Erayadaada furniinkoodu wax buu iftiimiyaa." Sabuurka 119:130


Dhammaad

Qisadan ku xusan Kitaabka Quduuska ahi waxay inoo sheegaysaa wax ku saabsan Ilaaheenna cajiibka ah ee ina sameeyay isla markaasna kaa raba inaad isaga ogaato.

Ilaah wuxuu ogsoonyahay inaan samaynay waxyaalo xunxun, kuwaas oo uu Ilaah ku magacaabo denmbi. Ciqaabka denbiguna waxa weeyi dhimasho, laakiinse Ilaah aad ayuu kuu jecelyahay waxaanu kuusoo diray Wiilkiisa madiga ah oo ah Ciise, si uu ugu dhinto iskutallaabta korkeeda una maro ciqaabka denbigaaga. Kaddib Ciise dib ayuu usoo noolaaday isagoo aaday Samada! Haddii aad Ciise rumaysantahay oo aad weydiisato inuu kaa cafiyo denbiyadaada, waa uu kaa dhaafi doonaa! Waa uu iman doonaa isagoo adiga kugu dhex noolaan doona, oo adiguna isaga ayaad weligaa la noolaan doontaa.

Haddii aad rumaysantahay in middani ay run tahay, sidan ku dheh Ilaah: Qaaligaygii Ciisow, waxaan rumaysanahay inaad tahay Ilaah, iyo inaad noqotay aadane si aad uugu dhimato denbiyadayda, oo imikana dib ayaad u noolaatay. Fadlan noloshayda soo gal oo cafi denbiyadayda, si aan markaas imika u helo nolol cusub, oo maalin maalmaha ka mid ahna aan adiga kuula jiro abid. Igu caawi inaan ku addeeco oo aan u noolaado sidii anigoo ah ilmahaaga. Aamiin.

Akhri Kitaabka Quduuska ah oo maalin walba la hadal Ilaah!
Yooxanaa 3:16